



XAQIIQOOYINKA KOOBAN EE

Dookhyada Caymiska Caafimaadka ee NY State of Health inta lagu jiro Xaalada Degdega ah ee Korona fayras


Waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad oo qiimo jaban ah.

NY State of Health ayaa ah Suuqa (Marketplace) rasmiga ah ee Caymiska caafimaadka York.

Maanta Is diiwaangeli.

 Booqo barta oonleenka ah ee nystateofhealth.ny.gov

 Wac taleefanka
1-855-355-5777
TTY: 1-800-662-1220

 Kala xariir Caawiyaha
Dhanka Diiwaangalinta
ciwaanka
[info.nystateofhealth.
ny.gov/findassistor](https://info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor)

NY State of Health waxay u hoggaansanta sharciyada xuquuqaha madaniga Federaaliga ee lagu dabihi karo iyo sharciyada gobolka, oo wax kuma takoorto qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, heerka guurka, gabood falka guriga heerka dhibanaha iyo/ama aargoosiga.

NY State of Health ayaa diyaar u ah inay ku caawiso. Waxaan u taaganahay inaan kaa caawino helitaanka **caymiska aad u baahan tahay si aad u hesho **daryeelka aad u baahan tahay**.**

Haddii aadan haysan Caymis:

- Qof kasta oon lahayn caymis caafimaad waa inuu **hadda caymis ka codsadaa** suuqa NY State of Health.
- New York ayaa furtay mudada diiwaan galinta khaaska ah ee "xaaladaha garka ah" oo la siinaayo qof kasta oo aan lahayn caymis inuu codsado caymiska Qualified Health Plan.
- Diiwaan galinta ayaa u furan dhammaan Barnaamijka NY State Health: Medicaid, Essential Plan, Child Health Plus, iyo Qualified Health Plans.

Haddii aad Lumisay Shaqadaada iyo Caymiska Caafimaadka:

- Haddii aad lumisay caymiskaaga caafimaadka ee aad ka heli jirtay shirkada aad u shaqayso, **hadda caymis ka codso** suuqa NY State of Health.
- Waxaad u qalmi kartaa caymis bilaash ah ama raqiis ah ood ka hesho Medicaid, the Essential Plan, Child Health Plus, ama waxaad u qalmi kartaa caawimaada canshuurta ee Qualified Health Plan.
- Nasoo wac, booqo websetkeena ama la hadal caawiyaha dhanka diiwaan galinta si aad u hesho xog dheeraad ah.
- Ka codso caymiska Suuqa caymiska (Marketplace) 60 maalmood gudahood marka aad lumiso caymiska aad ka hesho shirkada aad u shaqayso.

Dookhyada Caymiska Caafimaadka ee NY State of Health inta lagu jiro Xaalada Degdega ah ee Korona fayras

Haddii aad leedahay caymis aad ka hesho NY State of Health laakiin Xaaladahaagu Is badaleen:

- Qof kasta oo waajaha isbadal ku dhaca dakhligiisa, shaqada, ama dhacdo kale oo nololeed oo wayn, ayaa u qalmi kara caawimaad dhaqaale oo hoos u dhigi karta khasaaroyinkaaga. Wax ka badal xogta koontadaada isla maanta- qaab onlayn ah ama adoo wacaaya caawiyaha diiwaan galinta.
- Dhammaan dadka ka qoran Medicaid, Child Health Plus, ama Essential Plan kuwaasoo laga doonaayo inay caymiskooda soo cusboonaysiiyaan bisha Abriil ama Maayo 2020 waxaa loo kordhinayaa mudada soo cusboonaysiinta caymiskooda afar bilood oo dheeraad ah.
- Dadka ka diiwaan gashan caymiska laga caawiyo ama aan laga caawin ee Gobalka New York waxay heli karaan waqti dheeraad ah oo ay ku baxshaan lacagahooda joogtada ah ee lagu yeeshay mudada lagu jiro xaalada degdega ah ee caafimaadka dadwaynaha. Xog dheeraad ah oo ku saabsan mudooyinka caawimaad ayaa laga heli karaa [Department of Financial Services](#) iyo [NY State of Health](#).

Waxaa jiro Sadex Qaab oo loo Codsado:

1: Iska Diiwaangeli Websetkeena: nystateofhealth.ny.gov

- Booqo barteena onlaynka ah anaga ayaana kaa caawinayna helitaanka caymiska daryeel caafimaad oo kugu haboon.

2: Iska diiwaangeli khadka taleefanka adoow wacaaya Caawiyaha Diiwaan galinta

- Kumanaan caawiyaasha diiwaan galinta ah ayaa diyaar u ah gobalka oo dhan inay ku caawiyaan. Guji mid kamid ah lifaaqyada hoose si aad u hesho caawiye:
 - [Halkaan Ka hel Qof ku Fahansiya Nidaamka](#)
 - [Halkaan ka hel Caawiyaasha kale ee Diiwaan galinta](#)

3: Iska diiwaangeli khadka taleefanka adoow wacaaya Adeegga Macaamiisha: 1-855-355-5777

Xogo dheeraad ah oo cusub oo ku saabsan Korona Fayraska Cusub ayaa [laga helayaan halkaan](#). Kusoo laabo barta si aad u hesho wararkii ugu danbeeyay.